



**UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 17/09/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXISO:-</b> HAMDİ AHMED NUR, Hooyo: Muxubo Xersi Xasan, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 13/03/1986, Sita: Somali Passport, Lr. P01080211	<b>LA WAKIISHE:-</b> ABDIRAHMAN ALI EID, Ina Mako Maxamed Calasow, Somali ah, Ku Dhashay: Ceeldheer, Sanadkii: 02/02/1984, Sita: Somali Passport, Lr. P01576855
---	---

**B-** Aniga oo ah **HAMDİ AHMED NUR**, Kana mid ah saaamileyda shirkadda **IBNU-SIINAA FOUNDATION FOR DEVELOPMENT** sida ku cad Warqadda Dhismaha Sharikadda Ref: XNM/867/16, Tr. 24/01/2016, kana soo baxday Xafiiska Nootaayo Muqdisho, uuna saxiixay **Dr. Ibraahim Maxamed Axmed**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **ABDIRAHMAN ALI EID** una wakiishay dhamaan Saamiga aan ku leeyahay shirkadda **IBNU-SIINAA FOUNDATION FOR DEVELOPMENT**, in uu iibin karo, wareejin karo, maamuli karo, iina saxiixo karo duckmiintiyada la iiga baahanyahay ee wareejinta saamigeysana dhamaan saamiga aan ku leeyahay shirkadaas kor ku xusan.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDIRAHMAN ALI EID** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Saamigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **ABDIRAHMAN ALI EID**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **HAMDİ AHMED NUR**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**

HAMDİ AHMED NUR  


**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

ABDIRAHMAN ALI EID  


**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- ABDIRAHMAN AHMED NUR  


2- CABDIKAAFI AXMED XIRSI  


**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**


REP. 1832/T.P.N/25, Tr. 17/09/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **HAMDİ AHMED NUR** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **ABDIRAHMAN ALI EID** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul

By: ABDULL



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





**Xeerka Asaasiga ah ee  
Ibnu - Siinaa  
Foundation For  
Development**

**(مؤسسة ابن سينا للتمية)**





MOGADISHU PUBLIC NOTARY

Ref: XNM/867/16

Tr: 24/01/2016

**UJEEDO: DHISMO SHARIKAD SAAMILEY XADIDAN.**

**Muqdisho:** Maanta oo ay taariikhdu tahay **24/01/2016**, Nootaayada muqdisho oo kutaal magalada Muqdisho Deg. Hodan Xaafadda Taleex Agagaarka Masjid Ramadaan oo uu ka howl galo **Dr. Ibraahim Maxamed Axmed** waxaa xafiiska nogu yimid iyagoo ku soo heshiiyay nagana codsadeen in aan u kala qorono Heshiis ku saabsan Dhismo Sharikad saamileey xadidan, kana shaqeeneysa adeegyada caafimaadka, waxbarashada iyo horumarka, dadka soo socda.

**Aas'aasayaasha Sharikadda**

No	Magaca	Magaca Hooyada	Goob dhalasho	Sannad dhalasho
1	Dr Cabdiraxmaan Cali Ciid	Mako Max.ed Calasow	Ceeldheer	1984
2	Dr Saciid Sh Maxamed Abuukar	Aamino Barow Caadle	Jowhar	1984
3	Dr Xamiida Axmed Nuur	Muxubo Xirsi Xasan	Muqdisho	1986
4	Cabdirashiid Cali Ciid	Mako Max.ed Calasow	Ceeldheer	1986

Dadkaas oo aan hubsaday in la yiraahdo magacyadaasi waxa ay i weydiisteen in aan u qoro qoraalkooda ku saabsan dhismo Sharikad ka shaqeeysa ganacsiga, dhismaha iyo adeegga guud.

**XEERKA ASAASIGA AH EE SHARIKADDA.**

**QODOBKA 1aad.**

➤ **Magaca.**

Magaca Sharikadda waa **Ibnu - Siinaa Foundation For Development**

(مؤسسة ابن سينا للتنمية)

**QODOBKA 2aad**

➤ **Wagtiga la'aas'aasey.**

Sharikaddawaxaa la aas'aasay sanadkii **2013**, waxana lagu aas'aasay Magaalada **Muqdisho**.

**QODOBKA 3aad.**

➤ **Astaanta Sharikadda.**

Astaanta shirikaddu waa: ubax cagaar ah hoosna laga dhigay laba gacmood oo calanka Soomaaliya ku midabeysan.



*(Handwritten signatures in blue ink)*

**QODOBKA 4aad.****➤ Saldhiga Sharikadda.**

Saldhigga shirikaddu waa magaalada **Muqdisho**, waxa ayna laamo ku yeelan kartaa Gobolada Dalka iyo Dibaddaba.

**QODOBKA 5aad****➤ Nooca Sharikadda.**

Habka sharci ee shirikaddu waa mid ku salaysan habka loo yaqaano (**Limited Liability Company**), waxana ay leedahay shakhsiyad qaanuuniyadeed oo iskeed u taagan (**Juristic Personality or legal entity**).

**QODOBKA 6aad.****➤ Ujeeddada Sharikadda.**

Ujeeddada Sharikaddu waa:-

- Abuuris fursado shaqo si looga faa'ideeyo bulshada.
- Kenista iyo ka ganacsiga qalab caafimaad iyo daawooyin wax tar u leh Shacabka Soomaaliyeed.
- Sameynta xiriir iskaashi dalka gudahiisa iyo dibadiisa.

**QODOBKA 7aad.****➤ Ra'sumaalka Sharikadda.**

Ra'sumaalka Sharikadda lugu aasaasay waa: \$100.000 (boqol kun oo doolar maraynkan ah) waxaana ku talagalka Sharikadu yahay in Ra'sumaalka la siyaadiyo ayada oo sheerar la siin doono maal giliyaasha cusub.

**QODOBKA 8aad.****➤ Saamiyada iyo sida loo kala leeyahay.**

Ra'sul maalka Sharikaddu waa **\$100,000** boqol kun oo doolar, waxaana loo kala leeyahay sida soo socota:

No	Magaca	Tirada saamiga	Qiimaha saamiga	Qiimaha guud	Boqolkiiba
1	Dr Cabdiraxmaan Cali Ciid	5.5 saami	\$11,111.1	\$55,555.5	55,555%
2	Dr Saciid Sh Maxamed Abuukar	2.2 saami	\$11,111.1	\$22,222.2	22,222%
3	Dr Xamiida Axmed Nuur	1.1 saami	\$11,111.1	\$11,111.1	11,111%
4	Cabdirashiid Cali Ciid	1.1 saami	\$11,111.1	\$11,111.1	11,111%

wadar guud Waa **\$100,000/** (boqol kun oo doolar kaliya)



### **QODOBKA 9aad.**

➤ **Tirada dadka Aas'aasayaasha ah.**

- ❖ Sharikaddu waa saamiley ay lahaanshaheeda leeyihiin afarta qofood ee kor ku sheegan, hase yeeshee saamileydu waxay awood u leeyihiin inay ku soo daraan qofkii ay u gartaan ayagoo u samaynaya warqad caddeyneysa saamiga uu ku darsaday shirkadda.
- ❖ **Aas'aasayaasha (Board Of Directors)**, waxa uu ka kooban yahay afarta xubnood oo Aasaasayaasha ah, waana hay'adda ugu sareysa Sharikadda, ayaga ayaana dooranayaa Xubnaha fulinta (**Executive Officers**) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- ❖ Xeer hoosaadka Shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya Xeer hoosaadyada Aas'aasayaasha Shirkada. Waxa ayna Xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka Guud ee Shirkada .
- ❖ Inta shirkadu kabalaaraneeyso Aas'aasayaasha afarta ah ee hadda wada leh shirkada ayaa sii maamulaayo inta lagasoo magacaabayo golaha fulinta.
- ❖ Wixii la xariira dhaqaale iyo maaliyad waxaa isla saxiixaya guddoomiyaha golaha fulinta iyo xisaabiyaha.
- ❖ Qofkii lumiya xubinnimadiisa ama iibsada saamigiisa oo dhan waxaa ka reeban inuu sii isticmaalo magaca iyo astaanta shirkadda.

### **QODOBKA 10aad.**

➤ **Buugga Hantida Saamileyda.**

Buugga hantida Saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:-

- inta uu la'eg yahay Qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubin kasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray iyo dhamaan warbixinadiisa oo tifatiran.
- Waxaa Kaydinaya Xoghayaha Maamulka sharikadda.
- Waxaa saxiixayo Maamulka Sharikada marka la dhamaystiro caddaymaha Saamiga & Saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, Waxaana saxiixaya Maamulka Sharikada Iyo Saamilaha.

### **QODOBKA 11aad.**

➤ **kordhinta iyo dhimidda ra'sumaalka.**

Maaliyadda Sharikadda waa la kordhin karaa, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaan isku raacaan xubnaha Sharikadda intooda badan ahna (2/3), lana waafajiyo sharciga Sharikadda.

### **QODOBKA 12aad.**

➤ **Iibin saami**

Xubin kasta waxay iibin kartaa saamigeeda ay ku leedahay Sharikadda, waxaana mudnaanta la wareegidda leh xubnaha Sharikadda, haddii muddo hal bil ah la waayo xubin ka mid ah Sharikadda oo la wareegta saamiga la iibinaayo saamiluhu waxa uu xaq u leeyahay inuu ciddii dalbanaysa ka iibiyo ka dib marka ay aqbalaan qofkaasi Gudiga Sare ee asaasayaasha.

*(Handwritten signatures in blue ink)*



**QODOBKA 13aad.****➤ Xubintii geeriyoota.**

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah Hantiilayaasha Sharikadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah oo soo magacaabanaya wakiil hadii ay ogolaadaan in Sharikada ay kashii mid ahaadaan, sidoo kale hadii ay dalbadaan in saamigooda labaxaan sanad xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

**QODOBKA 14aad.****IlahaMaalgelinta Sharikadda.**

Ilaha maalgelinta Sharikadda waa maalgelinta saamileyda, deymaha waafaqsan shareecada islaamka I.W.M.

**QODOBKA 15aad.****Xisaabta Sharikadda.**

**Xisaab xirkaSharikadda:-** Xisaabta Sharikadda waxaa la xirayaa 31ka December ee sanad kasta dhamaadkiisa.

2. **Zekada:-** Xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixiniyaa zekada ku waajibtay waxaana masuuliyadeeda leh maamulka Sharikada.

3. **Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:-** Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida Sharikadda, waxaana la qeybinayaa 31 Jannaayo.

**QODOBKA 16aad.****Shuruudaha ka mid Noqoshada.**

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara Sharikadda:-

- ❖ waa inuu ogolaasho ka haystaa Sharikadda si uu uga mid noqdo saamilayda.
- ❖ waa inuu dhiiba saamiga u xadidan Sharikadda oo dhamaystiran
- ❖ waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka Sharikadda.
- ❖ waa in uuna dalka kagalin fal dambiyeed ama ficillo wax u dhimaaya sumcada qofka.

**QODOBKA 17aad.****Luminta Xubinnimada:-**

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamilayda Sharikadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan Sharikadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca Sharikadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamilayda waa loo celinayaa xuquuqdiisa faa'iido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

**QODOBKA 18aad.****Baabi'idda Sharikadda.**

Sharikadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaaddo xaaladaha hoos ku xusan :-

1. Haddii dhammaan ay isku racaan baabi'inta Sharikadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida Sharikadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna waydo kabidda saamilayda.



Handwritten signatures in blue ink, including a large signature that appears to be 'Abdullah' and another signature that is less legible.

**QODOBKA 13aad.****➤ Xubintii geeriyoota.**

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah Hantiilayaasha Sharikadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah oo soo magacaabanaya wakiil hadii ay ogolaadaan in Sharikada ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale hadii ay dalbadaan in saamigooda labaxaan sanad xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

**QODOBKA 14aad.****IlahaMaalgelinta Sharikadda.**

Ilaha maalgelinta Sharikadda waa maalgelinta saamileyda, deymaha waafaqsan shareecada islaamka I.W.M.

**QODOBKA 15aad.****Xisaabta Sharikadda.**

**Xisaab xirkaSharikadda:-** Xisaabta Sharikadda waxaa la xirayaa 31ka December ee sanad kasta dhamaadkiisa.

2. **Zekada:-** Xisaab xirka ka dib, inta aan la qeybin faa'idada iyo khasaaraha waxaa laga bixiniyaa zekada ku waajibtay waxaana masuuliyadeeda leh maamulka Sharikada.

3. **Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha:-** Qeybsiga faa'idada iyo khasaaraha waxaa lagu jaangoynayaa saamiga ay xubin kasta ku leedahay hantida Sharikadda, waxaana la qeybinayaa 31 Jannaayo.

**QODOBKA 16aad.****Shuruudaha ka mid Noqoshada.**

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara Sharikadda:-

- ❖ waa inuu ogolaasho ka haystaa Sharikadda si uu uga mid noqdo saamilayda.
- ❖ waa inuu dhiiba saamiga u xadidan Sharikadda oo dhamaystiran
- ❖ waa in uu ogolaado, saxiixana xeerka Sharikadda.
- ❖ waa in uuna dalka kagalin fal dambiyeed ama ficillo wax u dhimaaya sumcada qofka.

**QODOBKA 17aad.****Luminta Xubinnimada:-**

- Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamilayda Sharikadda.
- Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan Sharikadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca Sharikadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamilayda waa loo celinayaa xuquuqdiisa faa'iido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

**QODOBKA 18aad.****Baabi'idda Sharikadda.**

Sharikadda waxay ku baabi'i kartaa marka ay timaaddo xaaladaha hoos ku xusan :-

1. Haddii dhammaan ay isku racaan baabi'inta Sharikadda.
2. Haddii uu burbur ku yimaado dhammaan hantida Sharikadda.
3. Haddii ay soo wajahdo hoos u dhac maaliyadeed ayna waydo kabidda saamilayda.



Two handwritten signatures in blue ink are visible at the bottom of the page. The signature on the left is more stylized, while the one on the right is more legible and appears to be 'Ibrahim Mohamed Ahmed'.

**QODOBKA 19aad.****Habka uu ku dhacayo baabi'dda Sharikdda.**

Baabi'idda Sharikadda wuxuu u dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarin heerka maaliyadeed ee Sharikadda.
2. Bixinta daymaha Sharikadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanayaa hadba inta boqolkiiba uu saamigiisa la'eg yahay.

**Qodobka 20aad.** Masuuliyadda iyo awoodaha Golaha Agaasinka (aasaasayaasha)

- 1- Golaha Agaasinka (Board of directors) waxay ka soo baxayaan mulkiilayaasha ku bahoobey aasaaska shirkadan guud ahaan, waxaana u mudan in xilka maamul uu qabtaa qofka ugu saamiga weyn iyado shuruud laga dhigayo in aqoon ahaan iyo cafimaad ahaan uu kasoo bixi karo xilkaa, islamarkana isku raacsanyihiin asaasayasha kale intooda badan 2/3.
- 2- Habka awood qeybsiga waa mid ay u siman yihiin xubnaha golaha agaasinku oo ku salaysan nidaamka saamiyada qiimeysan, taasoo macnaheedu yahay in xubin kastaa percentage ka samigiisa cod u dhigma leedahay.

**Qodobka (21aad )** Qaabka doorashada iyo casilaada Golayaasha maamulka.

- ❖ Waxa lagu magacaabi karaa maamul cusub ama loogu cusboonaysiin karaa kii hore marka ay u codeeyaan 51% oo ah codadka Golaha Agaasinka guud ee shirkadda
  - Casilaada Guddoomiyaha Golaha sare (aasaasayaasha)
- Soo jeedinta casilaada Golaha fulinta waxa laga fadhiisanayaa marka ay soo jeediyaan ugu yaraan 33% cod (sadex dalool hal dalool) oo codadka maamulka sare ee shirkadda kamid ah.
- Golaha Agaasinku waxa ay cod hal dheeri ah 51% ku casili karaan guddoonka golaha Agaasinka (Board of directors) , sidoo kale Guddiga fulinta.
  - Habka Goaan qaadashada
- Habka go'aan qaadashada Maamulka shirkaddu waa mid ku salaysan is qancin iyo is fahan, hadiise arimaha qaar laysa ogolaan waayo waxa lagu kala baxayaa awood cod dheeri oo ku salaysan tirada xubnaha G/agaasinka

**QODOBKA 22aad.****Fadhiyada saamileeyda.**

Fadhiyada saamileeyda waxey u dhacayaan sida soo socota:

1. Kulamada caadiga ah ee Saamileeyda waxay dhacayaan sanadkiiba mar.
2. Godoomiyaha waxa uu isugu yeeri karaa kulamo deg deg ah haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay is ku raacaan xubnaha Sharikadda intooda badan ahna (2/3)
3. Xubin walba waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ogeysiis kulanka caadiga ah muddo bil ka hor mudada kulanka iyadoo loogu soo dirayo ciwaankiisa ku xusan xeer hoosaadka.

*(Handwritten signatures in blue ink)*



**QODOBKA 23aad.****Gudoominta Shirarka.**

Shirarka kala duwan ee Sharikadda, waxaa shir gudoomiye ka noqonaya gudoomiyaha Aasaasayaasha Sharikadda, haddii uu maqanyahay gudoomiyaha, waxaa shirarka gudoominaya ku xigeenkiisa ama cidii kale oo si qoraal ah ugu wakiisho gudoomiyuhu marka lawaayo ku xigeenkiisa.

**QODOBKA 24aad.****Aas'aasayaasha Sharikadda. (Board Of Directors).**

Aas'aasayaasha Sharikadda ayaa soo Magacaabaya Xubnaha fulinaya Howl maalmeedka Sharikada ayaga ayaana ka qaadi Kara xilalka hadii loo baahdo.

**QODOBKA 25aad.****➤ waxyaabaha aan lagu xusin Xeerkan.**

Dhammaan waxa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonayaa Sharciga Islaamka qeybta mucaamalaadka iyo Sharikadaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.

FG. wixii Shareecada islaamka ka hor imaanaya waa wax kama jiraan.

**QODOBKA 26aad.****➤ Xeerkan waxa uu ka kooban yahay 29 qodob.**

**Qodobada 27aad.** Magaca Sharikadda ayaa loo isticmaalayaa dhamaan hantida Sharikadda sida: guryaha, gaadiidka, Bakhaarada, qalabka, Bank Account, tiimbarayaasha, iwm.

**Qodobka 28aad.****➤ Nuqulada Heshiiska.**

Xeerkan waxa uu ka kooban yahay laba nuqul oo asal ah, hal nuqul waxaa la siinayaa aasaasayaasha Sharikadda, midka kalana waxaa la dhigayaa xafiiska Nootaayada si loo kaydiyo.

*[Handwritten signature]*

*[Handwritten signature]*





*[Handwritten signature]*



**OODOBKA 29aad:****➤ Saxiixa saamilayda**

kadib markii ay aqriyeen saamileydu qodobada uu ka koobanyahay Xeerka Sharikadda, iyaga oo aan cidina qasbin isla markaana maskaxda ka fayow, waxa ay Nootaayada horteeda ku saxiixeen xeerkan ah dhismo Sharikad la magac baxday **Ibnu - Siinaa Foundation For Development** (مؤسسة ابن سيناا للتنمية)

**Ref: XNM/848/16****Tr: 06/01/2016****Saxiixa Xubnaha Aasaasayaasha Sharikadda**

No	Magaca	Saxiixa
1	Dr Cabdiraxmaan Cali Ciid	
2	Dr Saciid Sh Maxamed Abuukar	
3	Seynab Axmed Nuur kana wakiil ah Dr Xamiida Axmed Nuur	
4	Cabdirashiid Cali Ciid	

**Ref: XNM/867/16****Tr: 24/01/2016****Sugitaanka Nootaayaha.**

Aniga oo ah Nootaayo Muqdisho **Dr. Ibraahim Maxamed Axmed**, kuna leh Xafiis Nootaayo magaalada Muqdisho Deg. Hodan Xaafadda Taleex Agagaarka Masjid Ramadaan, waxaan halkan ku caddeynayaa in in Saxiixyada kor ku Qoran ee ku saabsan Aas'aasida Sharikad ka shaqeenaysa adeegyada caafimaadka, waxbarashada iyo horumarka, lana magac baxday **Ibnu - Siinaa Foundation For Development** (مؤسسة ابن سيناا للتنمية) ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee 1- **Dr Cabdiraxmaan Cali Ciid** ina **Mako Max.ed Calasow** ku dhashay **Ceeldheer** sanadkii 1984kii wata Baasaboar No: **P00132330** Soomaali ah Deggan Xamar. 2- **Dr Saciid Sh Maxamed Abuukar** ina **Aamino Barow Caadle** ku dhashay **Jowhar** Sanadkii 1984kii wata Baasaboar No. **P00258027** Soomaali ah, Deggan Muqdisho 3- **Dr Xamiida Axmed Nuur** ina **Muxubo Xirsi Xasan** ku dhalatay **Muqdisho** Sanadkii 1986kii wadata Baasaboar No. **P00161510** Soomaalish, waxaana wakiil ka ah oo u saxiixayo xeerkaan **Seynab Axmed Nuur** Soomaali ah Deggan Muqdisho. 4- **Cabdirashiid Cali Ciid** ina **Mako Max.ed Calasow** ku dhashay **Ceeldheer** sanadkii 1986kii wata Baasaboar No: **P00233211** Soomaali ah Deggan Muqdisho, waxa ay Nootaayada horteeda ku saxiixeen Xeerkan ayaga oo miyir qaba cid qasabtayna aysan jirin waana Sharikad ansax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee dalka. waxaana lagu qoray diiwaanka Nootaayada.

**NOOTAAYAHA MUQDISHO****Dr. Ibraahim Maxamed Axmed**

Tel : 0615559188/ 0699766110/ 0625559188

E-mail : [ibramm@live.com](mailto:ibramm@live.com)



**Qunsuliyadda Guud ee Jamhuuriyadda Federaaliga ee Somaliya, Dubai**

Tel.: +971 4 2722559, Fax : +971 4 2711203, P.O. Box : 63993, Dubai - United Arab Emirates  
E-mail: somcon@eim.ae

**UJEEDDO: CADDAYN WAKAALAD GAAR AH**

ANIGOO AH XAMIIDA AXMED NUUR SITA BASBOOR LAM P00161510, WAXAAN CADDAYNAYAA IN AAN SIIYEY WAKAALAD GAAR AH ZEYNAB AXMED NUUR SITADA BASBOOR LAM P00108187, WAKAALADDAAS OO KU SAABSAN QAYBTA AAN KU LEEYAHAY HAY'ADDA LA YIRAAHDO IBNU-SIINA FOUNDATION FOR DEVELOPMENT. WAKAALADDAASI WAXAY AWOOD U SIINAYASAA ZAYNAB AXMED NUUR IN QAYBTAYDA IIGA MAS'UUL NOQOTO, WIXII SAXIIX LA IIGA BAAHDO WAY SAXEEXI KARTAA, MEESHII LA IIGA BAAHDONA WAY I METELI KARTAA.

SIDAA DARTEED ANIGOO AH, XAMIIDA AXMED NUUR WAXAAN WAKAALADDAN SAXIIXAY ANIGOO RAALI AH CAQLIGAYGUNA TAAM YAHAY .

SAXIIXA AWOOD BIXIYAHA

XAMIIDA AXMED NUUR



**MARKHAATIYAAL**

1- DAAHIR MAXAMED JAAMAC AQOONSI LAM 784-70-7198541-6-1-5

2- CABDULQAADIR FAARAX MAXAMED LAM 784-1353265-2

**QUNSULIYADDA GUUD EE J.F. SOMMAALIYA DUBAI**

TIX: QSD/011/2015

DUBAI 31/ 12/2015

**CIDDII AY KHUSAYSO**

QUNSULIYADDA GUUD EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA EE DUBAI WAXAY CADDAYNAYSAA IN XAMIIDA AXMED NUUR AY QUNSULIYADDA HORTEEDA KU SAXIIXDAY, WAKAALADDA KOR KU XUSAN IYADOO AYSAN QUNSULIYADDA WAX XIL AH KA SAARNEYN WIXII XUQUUQ DHAQAALE AH .

**QUNSULIYADDA GUUD EE J. SOOMAALYEED  
DUBAI**

عبدالله محمد آدن  
المستشار  
Abdullahi Mohamed Aden












Jamhuuriyadda Soomaaliya  
Xukuumadda Federaaliga  
Wasaaradda Arrimaha Gudaha  
& Federaalka



جمهورية الصومال  
الحكومة الفيدرالية  
وزارة الشؤون الداخلية  
والفيدرالية

Ref.2015/ 0136-B

Somali Republic  
Federal Government  
Ministry of the Interior & Federal

Date: 19-10-15

HAVING SEEN: - The Charter of the Federal Government of Somalia.  
HAVING SEEN: - Article No 54 of Somalia Civil Law No.37 which issued 2/6/1973.  
HAVING RECOGNIZED: - The necessity of giving an authorization to work this NGO.  
HAVING SEEN: - The documents of the NGO.

The Minister of Interior and Federal has

AWARDED

LOCAL NGO Tbnu-dinag Foundation for development  
In Scrutinizing of valuable activities towards Humanitarian, Emergency, Environment, Health, Education, Welfare, Social, Development  
That this LOCAL NGO has been implementing during its existing time.  
So, this testimonial certifies that this Organization has a right to operate in the environment of Wajale District

NB. Validity of this certificate will be (1) or one year started from 20-10-2015

Director of the Department



Director General of the Ministry

*[Signature]*




## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 05/10/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan Cali Ciid** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1832/T.P.N/25, Tr. 17/09/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	C/raxmaan Cali Ciid
<b>La Wakiishay</b>	Saami
<b>Shirkadda</b>	IBNU-SINAA FOUNDATION FOR DEVELOPMENT
<b>Activity Report</b>	XNM/867/16 tR:24/04/2016
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	17/09/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **C/raxmaan Cali Ciid**, Leh Tel No. **0615002264**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



### SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

**Maxamed Cabdi Cali**

---

### SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

**C/raxmaan Cali Ciid**

---